Wadarta guud

Magaca ..............................................

Dugsiga..............................................

R/lambar.............................................

JUMHUURIYADDA SOMALILAND

WASAARADDA WAXBARASHADAIYO SAYNISKA

GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA
IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE FASALKA 8AAD

# AF-SOOMALI

**2020 - 2021**

**WAKHTIGA: 2 SAACADOOD**

**10 DAQIIQO OO DHEERAAD AH KU AKHRI WARAAQAHA SI AAD U HUBISO**

**TILMAAMO**

- Imtixaanku waxauu ka kooban yahay 10 waraaqood oo daabacan
- Tiri oo wergeli horjoogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama dheeraad yihiin

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 5 qaybood:

| | | |
|---|---|---|
| QAYBTA KOOWAAD: | Akhris | 30 Dhibcood |
| QAYBTA LABAAD: | Hees Hawleed | 6 Dhibcood |
| QAYBTA SADDEXAAD: | Maanso iyo Maahmaah | 29 Dhibcood |
| QAYBTA AFRAAD: | isku hagaaji | 15 Dhibcood |
| QAYBTA SHANAAD: | Curis | 20 Dhibcood |
| | **Wadarta Guud** | **100 DHIBCOOD** |

Ka jawaab dhammaan su'aalaha qaybta 1$^{aad}$ – 5$^{aad}$

Lama oggola Mobile iyo waraaqo kale

Scanned by TapScanner

## QAYBTA KOOWAAD: SHEEKO

**Miyi iyo Magaalo**
**Guryaha iyo Nadaafadooda.**

**Akhri sheekadan kadib ka jawaab weydiimaha ka dambeeya**

Dadku guryaha waxa uu u dhistaa in uu ku nasto, seexdo, waxa kale ee uu dadku guryaha u dhistaa in uu kaga badbaado oo ka magan galo waxyaabaha noloshiisa waxyeelada u geysanaya ee dhibaataynaya, kuwaasoo ay ka mid yihiin, dabaysha, kulka, qabawga, bahalaha iyo waxyaabo kale oo khatar galin kara nolosha dadka.

Miyi iyo magaalo waxa uu dadku leeyahay guryo uu u hoydo, dhigtana alaabo tiro badan oo wax ku qabsado.

Alaabta guryaha magaalada la dhigto way fara badan tahay waxaana ka mida ah; sariiro, furaashyo, miisas, darmooyin, jalxado iyo qaar kale oo badan.

Waxa jirta in ay xagga dhismaha ku kala duwan yihiin. Kuwa miyiga waxa laga sameeyaa cawska iyo geedaha dhulka ka baxa, waxaana loo yaqaan Aqal-Soomaali waxaanu ka kooban yahay Harraro, kabdo, Dhigo iyo Udbo. Halka kuwa magaaladana dhismahoodu kala duwan yahay qaarkood waxa laga sameeyaa dhoobo sida; Mundulka iyo Cariishyada qaarna loox baa laga sameeya sida sandaqadaha, qaa rkalena waxa laga dhisaa dhagax waana ka adkeysiga badan.

Guryaha Magaaladu waxay ka kooban yihiin qolal badan, sida: qolka Cuntada, qolka hurdadda, qolka fadhiga iyo akhriska, qolka cunto karinta iyo musqulo. Qol kastaa waxa uu leeyahay daaqado waaweyn oo gees walba u jeeda oo loogu talogalay in qorraxda iyo neecawduba si fiican uga soo galaan.

Haddaba, mar haddii ay yihiin guryahu meesha dadku waqtigiisa inta badan uu ku qaato, waxa haboon in laga ilaaliyo oo lagu dadaalo nadaafaddiisa, oo aan qashin lagu arag guryaha agtoodana lagu beeraa geedo hadh iyo bilicba u soojiida guriga, waayeelka iyo caruurtuna ay hadhsadaan xilliyada qaarkood.

Waliba waxa haboon in guryaha laga ilaaliyo cayayaanka cuduradda keena sida: diqsiga iyo kaneecada.



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

**(30dhibcood)**

**Goobo gali jawaabta saxda ah.**

1. Dadku guryaha waxa uu u dhistaa
   - B. In uu ku dhinto
   - T. In uu daawado
   - J. In uu ku nasto, oo uu seexdo
   - x. Midna

2. Waxa lagaga badbaada guryaha
   - B. Waxa dadka faa'iido u leh
   - T. Waxyaabo noloshiisa dhibaato u geysan kara
   - J. Wax aan dhib lahayn
   - x. Dhamaan

3. Guryaha waxa laga galaa:
   - B. Dabaysha, kulka, qabowga lwm
   - T. baabuurta iyo fardaha
   - J. xoolaha iyo dadka
   - x. Midna

4. Miyi iyo magaalaba waxa uu dadku leeyahay
   - B. Xoolo ay dhaqdaan
   - T. Guryo ay u hoydaan
   - J. Xero ay xoolaha ku xareystaan
   - x. Beero ay qotaan

5. Guryaha miyigu waxay ka samaysan yihiin
   - B. Dhagax
   - T. Sibidh
   - J. Caws iyo geedo
   - x. Jiingad

6. Guryaha ugu adkaysiga badani waa
   - B. Kuwa dhoobada laga sameeyo
   - T. Kuwa dhagaxa laga sameeyo
   - J. Kuwa looxa laga sameeyo
   - x. kuwa cawka laga sameeyo



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

7. Guryaha maagalaadu waxay ka kooban yihiin
   B. Qol kaliya
   T. Qol iyo musqul
   J. Qolal badan
   x. Midna

8. Guryaha magaalada qol kastaa waxa uu leeyahay
   B. Musqul u gaara
   T. Daaqad iyo albaab
   J. Catabada lagu caweeyo
   x. dhoobo iyo caws

9. Guryaha waxa haboon in la ilaaliyo
   B. Nadaafadooda
   T. Cuntadooda
   J. Sibidhkooda
   x. daaqadadohooda

10. Daaqaduhu guryaha waxay u taraan
   B. In wax laga eego
   T. In la iska xidho
   J. In ay qorraxda iyo neecawdu ka soo galaan
   x. In dadka laga daawado

11. Guriga agagaarkiisa waxa haboon
   B. In qashinka lagu shubo
   T. In qashinka laga ilaaliyo
   J. In qashinka lagu ururiyo
   x. in qashinka lagu guro

12. Cayayaanka guryaha laga ilaaliyaa waa:
   B. Adhiga iyo digaaga
   T. Dameeraha iyo riyaha
   J. Diqsiga iyo kaneecada
   x. Fardaha iyo Lo'da

13. Alaabada guryaha magaalada loo sameeya waa
   B. Sariiro iyo furaashyo
   T. Dhigo iyo udbo
   J. Harrar iyo kabad
   x. Dhamaan



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

14. Dhirta iyo geedaha guriga agtiisa laga beero
    B. Waxa hadhsada xqolaha
    T. Waxa hadhsada dadka waaweyn iyo caruurta
    J. Waxa la dhigtaa gaadhiga
    x. Waxa hadhsada cayayaanka

15. Qolka cuntada waxa uu ka mid yahay
    B. Guryaha miyiga
    T. Guryaha magaalada
    J. Guryaha miyiga iyo magaalada
    x. Dhamaan

**QAYBTA LABAAD: HEES HAWLEED** **(6 Dhibcood)**

1. Naylaha yaryari
   Waa wiil dhashee
   Maa loo wanqalo

b. Heestan yaa loogu heesaa? (2 Dhibcood)

............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................

2. Hagi hagi dameeraaday
   Haasaawe maleeleey
   Geelu wuu jalhiibtaye
   Joog lagu rarkaygiiyeey

b. Heestan yaa loogu heesaa? (2 Dhibcood)

............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................

3. Waa maxay hees hawleed? (2 Dhibcood)

............................................................................................................
............................................................................................................
............................................................................................................



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

## QAYBTA SADDEXAAD: MAANSO IYO MAAHMAAH (29Dhibcood)

### B. MAANSO (14 Dhibcood)

1. Sheeg abwaanka tiriyey gabayga la magac baxay gogol shisheeye? (2 Dhibcood)

..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................

b. Muxuu uga jeeday labadan bayd gabayaagu

**"Niman yahoo dadkii waxa gambiyey**
**Damasho gaalaade**
**Gaashaanka dhaqankii ahaa intaa la gees mariyey"** (2 Dhibcood)

..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................

t. "Gudcur buu dadkii moodayaa galal dharaareedo" (2 Dhibcood)

..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................

2. Sheeg ujeedadii gabayga fiinta? (2 Dhibcood)

..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................

b. Sharax kooban ka bixi baydkan
"Ayax kuma dhaleen kaymihii ubaxa weynaaye" (2 Dhibcood)

..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................
..................................................................................................



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

t. Sharax kooban ka bixi baydkan
"Meeshad ubadka dhigan lahayd
Uun kalaa dagaye" (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

3. Sheeg abwaankii tiriyey geeraarka nabad iyo ujeedada uu u tiriyey? (2 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

**t. MAAHMAAHYO** **(15Dhibcood)**

Maahmaahyadan keen ujeedada loo adeegsado:

1. Waan baahanahay looma bahalo cuno. (3 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

2. Hadal nin si u yidhi nina si u qaaday. (3 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

3. Afeef hore lahaw ama adkaysi dambe. (3 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................

4. Gari laba nin kama wada qosliso. (3 Dhibcood)

.................................................................................................................
.................................................................................................................
.................................................................................................................



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

5. Geel laba jir soo wada mar.

(3 Dhibcood)

.................................................................................................................................

.................................................................................................................................

.................................................................................................................................

.................................................................................................................................

.................................................................................................................................

**QAYBTA AFRAAD**

**(15Dhibcood)**

**1. Ereyadan wadartooda sheeg**

(5Dhibcood)

| No | Eray-ga | Wadartiisa |
|---|---|---|
| 1 | Wiil | |
| 2 | Weyl | |
| 3 | Odey | |
| 4 | Habar | |
| 5 | Afo | |
| 6 | Ibtilo | |
| 7 | Raysmo-gaadho | |
| 8 | Weyso | |
| 9 | Webi | |
| 10 | Waran | |

**2. Erayadan soo socda mid kasta ku buuxi weedha ay ku haboon tahay**

**(5Dhibcood)**

| **Shan, Habeenkii, Tiirka, Muslimka, Weyn** |
|---|

B. Salaaddu waa ........................... ............ Labaad ee Islaamka.

T. Qofkastana waxa laga rabaa in uu tukado............... ....... Salaadood maalintii iyo ..............................

J. Salaadu waa tiirka ugu ..................................... ee Diinta Islaamka

X. Salaaddu waa astaanta lagu garto qofka ..................................ah.



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner

3 Ereyadan ku jira A ku hagaaji mid kasta mida ay la micno tahay kuwa B

(5 Dhibcood)

| No | A | B |
|---|---|---|
| 1 | Abley | Dacwad |
| 2 | Ashkato | Habeenkii |
| 3 | Asqayn | Toorri |
| 4 | Uuman | Wareerin |
| 5 | Allaylkii | Abuuran |

**QAYBTA SHANAAD** **(20 Dhibcood)**

**Qor curis ka kooban ugu yaraan (200) oo erey oo ka hadlaya faraqa u dhexeeya abaarta iyo barwaaqada.**

........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................
........................................................................................................................................

**DHAMMAAD**



© SLNECB, 2021

Scanned by TapScanner